

# COMMUNITY CONNECTIONS



## Community Connections — Kent Industrial Valley (Doox Warshadeedka Kent)

### Ma ka shaqeysaa doox warshadeedka Kent?

Haddii ay haa tahay, fadlan noo sheeg sidii aan u wanaajinlahayn transit-ka ama gaadiidka ee aan kuugu fudaydinlahayn inaad halkaastagto—wakhti kasta oo maalinta (afar iyo labaatanka saac) ee aad shaqayso ah.

Waxaan kala shaqeyneynaa Magaalada Kent si loo ballaariyo fursadaha gaadiidka ee dadka ka shaqeeya dooxda Kent Valley, oo ay ku jiraan kuwa leh saacadaha dambe ama hore ee saacadaha shaqada.

Haddii aad ka shaqeyso dooxda, ama u qorsheysanayo inaad mustaqbalka ka shaqeyso goobtaas, fadlan ka qaybgal ra'yi-ururintayada si aad noogu sheegto baahida gaadiidka aan kuu qancin karno iyada oo loo maro barnaamijkayaga Xiriiryada Kumunitiga (Community Connections).



**Waxaad ka heli kartaa ra'yi-ururinta internetka bartan  
[kingcounty.gov/metro/kentvalley](http://kingcounty.gov/metro/kentvalley)**

### Waayo dooxda Kent Valley?

Aaggan ayaa ah xarun shaqo oo muhiim ka ah gudaha Kent. Qaar badan oo ka mid ah shaqaalaheeda ayaa leh jadwallo aan lahayn fursado ay ku isticmaalaan adeegga baska ee hadda jira. Walibana, bey'adda abuurka dhulka iyo goobaha lugaynta dooxda ayaa ku jiraan caqabado dhibaato ugu leh cududda shaqaalaah kala duwan ee aagga ka jira ee sii kordhaya inay tagaan ama ka yimaaddiin shaqooyinkooda.

### Arrimaha Ku Saabsan Xiriiryada Kumunitiga

Barnaamijka Xiriiryada Kumunitiga ee Metro ayaa u keena adeeg qaybo ka mid ah King County ee aan lahayn kaabayaasha, cufnaanta, ama hab-qaaibeedyada adeegsiga dhulka si ay u taageeraan nidaamka cufan ee adeegga baska caadiga ah ee leh marinka u dejisan. Aagaggaas oo kale, adeegyada kale ee ka duwan ayaa laga yaabaa inay u noqdaan kuwo ku habbooni ka fiican u leh baahida gaadiidka kumunitiga. Wuxa kale oo dhici karta inay walibana dhaqaalaynta kharashka uga sii fiican tahay.

Barnaamijkan tusaalaynta afarta-sano ah ayaa ah fursad lagu tijaabinayo xallinta casriga ah ee dhibaatooyinka gaadiidka.

Ka ogow arrimo intaa u dheer oo ku saabsan barnaamijka iyo xallinta aan ka fekereyno ama aan hadda u fidino kumunitiyadayaada kale barta internetka ee ku taal: [kingcounty.gov/metro/community-connections](http://kingcounty.gov/metro/community-connections)

have a  
say

### Ra'yi ka dhiibo

#### Ka qayb-qaadashada kumunitiga

Metro ayaa u samaysay mashruucan koox hawlgal ka kooban arrimo daneeyeyaal. Xubnahooda waxa ka mid ah wakiillo ka socda loo-shaqeeyayaasha agagaarka iyo ururrada u adeega dadwaynahaa iyo kumunitiga ee ka jira agagaaraha una adeega dadwaynahaa kala duwan ee Kent, iyo sidoo kale xubin ka mid ah Guddiga Kumunitiyo Dhaqameedka magaalada.

Kooxda hawlalku waxay naga caawinayaan kor u qaadidda wacyigelinta kumunitiga iyo ka qaybgalka mashruucan, tilmaamidda baahiyada gaadiidka iyo dheellitir-la'aanta ka jirta doox warshadeedka Kent, iyo si talo looga bixiyo soo-saarka waxyabaha xalka u ah isku-kala socodka in la qanciyo baahiyada gaadiidka kumunitiga.